

## **Dhabar xanuun .....**

Wax xannuun ah dhabarka ma kaa hayaa oo ma doonaysaa inaad wax ka ogaatid cudurka la yiraahdo Bechterews iyo ururkeena? Haddaba waxaad timid meel sax ah!

### **Nooca Bukaanka**

Nooca bukaanka ee cudurka Bechterew waa qof dhalinyaro ah oo xannuun iyo tigtignaan ka hayso lafdhabarta, gaar ahaan waqtiga habeenkii, subaxii iyo marka aad muddo fadhidid. Waxuu cudurkaanu Isu bedbedelaa cudurkan, xanuun, tigtignaan iyo daal.

### **Calaamadaha ugu horeeya.**

Boqolkiiba 60 waxuu ka bilowmaa dhabar xanuun..

Boqolkiiba 30 waxuu ka bilowmaa laalaabyada.

Boqolkiiba 10 waxuu ka bilowmaa indhaha oo caabuq gala

### **Sidee caadi u yahay cudurku?**

Bechterew waxaa qaba ilaa iyo hal boqolkiiba dadka Iswiidhan ku sugan. Waxuu badanaa ku dhacaa raga marka loo barbardhigo dumarka. Waxuuna cudurku ku bilowmaa 15 jir iyo 35 jir. Cudurkan waxuu 20 goor ku badan yahay oo caadi ku yahay dadka ehelkoodu horey u qabeen cudurkan Bechterew, marka loo eego dadka ehelkoodu uusan horey u qabin cudurkaan. Boqolkiiba 95 dadka qaba cudurkan Bechterew waxay leeyihiin hidde – sideha HLA – B27.

### **Maxaa laga ogyahay Bechterew?**

Sababta keenta cudurkan lama yaqaan. Waxaa la ogaaday in cudurkaan ay saa'idiso haddii uu kugu dhaco caabuq soo noqnoqda ee ku dhaca bu'da isha (Iriter), ama cudurka baraska, ama caabuqa ku dhaca xiidmaha iyo infekshin ku dhaca marinada kaadida.

### **Sidee loo daweyyaa cudurka Bechterew?**

Jimicsi dhaqdhaqaaq joogto ah ayaa macno u leh horumarka xaga is bedbedelka cudurka. Warbixin sax ah ee cudurka waa mid muhiim ah daaweeyntiisa. Waxaa kaloo wax ka taraya daawooyinka xanuun bi'iyaha iyo daaweeyn ku dejinta caabuqa.

### **Ka dib xaaladu sidee noqonaysaa?**

Sida caadiga ah waa in lala qabsadaa cudurka shuruudihisa oo aadna ku noolaataa si fiican, badanaana qofku shaqadiisa ayuu sii wataa ilaa iyo hawlgab uu ka noqonayo.

### **Maxaad sameeyn kartaa?**

La xiriir Berig; Ururka bukaanka ee Bechterewreumatiker waxay ka qeybqaataan inay fidiyaan warbixin ku saabsan cudurkaan oo sidaasna lagu wanaajiyo nolol maalmeedka iyo mustaqbalka anaga qabna cudurka Bechterew.

## **Maxay Berig kugu qaban karaan?**

Waxaan idinku casumaynaa wadajir iyo warbixin, waxaan siineynaa aqoon dadka xubnaha naga ah, daryeele iyo go'aan gaarayaal. Aragtidayadu waa in aan cudurkaan ku baahino hay'adaha caafimaadka iyo dadka cudurkaan Bechterew qaba. Dhamaan dadka qaba cudurkaan Bechterew, waa iney ogaadaan in Berig jiro. Dhamaan siyaasiyiinta, dadka go'aamada gaara iyo dhakhaatiirta waa inay aqoon u leeyihiin cudurka Bechterew, si loo ogaado cudurka. Waxaan dooneynaa inaan ka qeybqaadano si ay cilmi baristu dhaqaale ku filan u helaan si loo helo cudurka waxyaalaha dhaliya. Berig waxaa ay qabanqaabiyaan xirfado dhaqdhaqaaq caafimaad ah tusaale ahaan jimicsiga berkada biyaha iyo jimicsi dhulka ah. Waxaan diyaarinaynaa warbixin aqoomeed, kulan baararka ah iyo kulamo fiican oo lagu kulmo. Waxaan si firfircoon uga qeybqaadanaynaa inay xubnahayaga dareemaan degenaan iyagoo helaya waxyaalaha hadba waxii soo kordha iyo warbiximaha muhiimka ah ee ku saabsan hadba daaweynta la heli karo.

## **Suaalo?**

Haddaad su'aalo qabto ku saabsan cudurka Bechterew iyo ururkeena, nagala soo xiriir cinwaankaan hoos ku qoran.

**Ku soo dhowoow wadajirkayaga!**

**BERIG**

**Bechterewreumatikernas Intressegrupp**

**Slottsskogsgatan 12**

**414 53 Göteborg**

**Telefon: 031 – 122023**

**[kansli@berig.se](mailto:kansli@berig.se)**

**[www.berig.se](http://www.berig.se)**